



otto ist vielfalt otto heißt willkommen otto informiert otto öffnet tür en otto verbindet

Xaashida macluumaadka ee jihaynta hore

Somali

# Waxbarasho iyo kaqeybgal

Adeegyada kaladuwani loogu talagalay waxbarashada iyo kaqeybgalka (BuT) waxay caawiyaan carruurta, dhalinyarada iyo dhalinyarada waaweyn ee ka soo jeeda qoysaska lacagta yar haysta. Adeegyadan, carruurtu waxay isticmaali karaan adeegyada dugsiga xanaanada carruurta, iskuulka iyo madadaalada taas oo haddii kale lacag lagu bixin lahaa.

Faa'iidooyinka laga helo waxbarashada iyo kaqeybgalka waxaa kamid ah:

- safaro hal maalin ah ama maalmo badan ah oo iskuulka ama xarunta xanaano-maalmeedka ay samayo (kharashyada dhabta ah),
- kharashaadka shahsiga loogaga baahan yahay iskuulka (€100 1-da Agoosto, €50 1-da Febraayo)
- Laga soo bilaabo fasalka 11aad iyo safarada dhaadheer ee loo galo dugsiga: gaadiidka ee ardayda geeya iskuulka (kharashyada dhabta ah ama qayb ka mid ah kharashaadka haddii ay kafaala qaadaan Dugsiga iyo Waaxda Isboortiga)
- Taageerada waxbarashada iyo umeerinta (kharashyada dhabta ah)
- kaqeyb qaadashada qadada guud ee iskuulka ama xarumaha xanaano-maalmeedka (kharashyada dhabta ah)
- Kaqeyb qaadashada nolosha bulshada iyo dhaqanka (sida naadiga isboortiga ama iskuulka muusikada 15 euro bishiiba)

Kuwa u qalma inay codsadaan waa carruurta iyo dhalinyarada hela gunnooyin waafaqsan SGB II, SGB XII, Sharciga Gunnada Guryaha (WOGG), Gunnada Dheeraadka ah ee Carruurta (KIZ) iyo Sharciga Gunnooyinka Magangelyo-doonka (AsylbLG). Foomamka codsiyada waxaa laga heli karaa dhammaan xafiisyada muwaaddiniinta, xafiiska macluumaadka qoyska (FIB) iyo xafiiska arrimaha bulshada. Wuxaa sidoo kale codsiyada u gudbin kartaa xafiisyada kor ku xusan ama waxaad xafiiska arrimaha bulshada ugu diri kartaa iimayl ahaan:

**Sozial- und Wohnungsamt** | Wilhelm-Höpfner-Ring 4 | 39116 Magdeburg | Taleefan 0391 5403670 ama 0391 5403671 | sozial-und-wohnungsamt@magdeburg.de

Macluumaad dheeraad ah ayaa sidoo kale laga heli karaa internetka [www.magdeburg.de/otto-city-card](http://www.magdeburg.de/otto-city-card)

Codsiga ka sakow, caddeyntha adeegga khuseeya ayaa sidoo kale loo baahan yahay:

- Xaqiijin laga helo dugsiga/xarunta xannaano-maalmeedka taas oo ku saabsan kaqeybgalka safarka (fasalka) ama dalxiiska
- Caddaynta kaqeybgalka qadada wadajirka ah taas oo laga soo helayo bixiyaha cuntada
- Heshiiska xubinnimada naadiga/dugsiga muusikada ama wax la mid ah
- Ka sokow codsiga taageerada waxbarashada, xaqiijinta iskuulka ee baahida loo qabo taageerada waxbarashada iyo bixinta kharashka, shahaadada ugu dambeysay iyo qoraalka diiwaanka ee hadda la hayo
- ee agabka iskuulka, shahaadada iskuulka laga soo bilaabo diiwaangelinta iskuulka ama da'ada 15 sano ee canuga

Gunnooyinka waxaa la bixiyaa oo keliya waqtii cayiman; Tani badanaa waxay ku xirantahay mudada ku qoran ogeysiiska laga helo Jobcenter/gunnooyinka guryaha/kaalmada carruurta iwm waana in markaas kadib la codsadaa. Isbeddelada, sida iska beddelka xarun/dugsi/xarun xannaano-maalmeed ama adeeg bixiye, waa in isla markiiba la soo sheegaa.

otto ist vielfalt otto heißt willkommen otto informiert otto öffnet tür en otto verbindet

Ka sokow waraaqaha macluumaadka ee ku qoran luuqadaha badan kuwaas oo ku jira macluumaad ku saabsan mowduucyo kala duwan oo badan, Hagaha Socdaalka ee Magdeburg waxaa ku jira talooyin badan oo hadda ah, adeegyada kaalmada iyo madadaalada.

[www.willkommen-in-magdeburg.de](http://www.willkommen-in-magdeburg.de)



Gefördert durch:



magdeburg